Cancer Council Victoria

# FactSheet



# Hepatitis B iyo kansarka beerka

Xaashidan macluumaadka waxay ku saabsan tahay fayraska hepatitis B (oo af Somali looyaqaan cagaarshow) iyo xiriirka uu la-leedahay kansarka beerka.

Ugu yaraan 240,000 Australian ah ayaa qaba 'chronic'hepatitis B. In badan ma yaqaanaan inay qabaan cudurka waxayna halis ugu jiraan kansarka beerka.

### Waa maxay hepatitis B?

Hepatitis B, ama 'hep B', waa fayras. Waxay saamaysaa beerka. Waxay sababi kartaa:

- kacsanaan (barar)
- haaraha (weliba loo yaqaan cirrhosis); iyo
- kansarka beerka.

### Waa maxay macnaha chronic hepatitis B ?

Dadka qaba hepatitis B wax ka badan lix bilood waxay qabaan chronic hepatitis B, chronic micnaheedu waa wakhti-dheer. Badankooda waxay qaadeen ayagoo ilmo ah ama carruur yaryar ah. Kuwa qaba chronic hepatitis B waxay dareemi karaan ladnaan. Waa laga yaabaa inaysan lahayn astaamaha infagshanka. Si kastaba ha ahaatee, dadka qaarkiis ayaa ku yeelan doona haaro beerka ama kansarka beerka.

### Sidee buu kugu dhici karaa hepatitis B?

Tallaalku wuxuu kaa ilaalin doonaa Fayraska hepatitis B. Fayraska hepatitis B wuxuu raacaa dureeraha iyo dhiigga jirka. Fayrasku wuxuu faafaa markii dureerahan uu galo jirka qof kale kaas oo aan tallaalayn.

Waxaa lagu faafin kara:

- hooyada oo u gudbisa ilmaha inta u uurka ku jiro ama dhalmada (haddii aan ilmahu ku helin tallaalka dhalmada)
- galmada aan lays ilaalin
- wadaagida qalabka durriinka daroogada
- habraaca daawaynta aan la nadiifin
- dhiigga infagshanka qaba oo si uun u raaca marinada-dhiigga sida taatuuga aan la nadiifin.

Laguma faafin karo ayadoo:

- la-wadaagayo cuntada, cabitaanka iyo maacuunka
- hab isa-siinta iyo dhunkashada
- gacmaha laysku salaamo.

### Sidee baad ku ogaan kadhaa inaad qabtid chronic hepatitis B ?

Weydii dhakhtarkaaga wixii baarista dhiigga ee hepatitis B. Baarista dhiigu waxay kuu sheegi kartaa inaad:

- qabto chronic hepatitis B
- u baahan tahay tallaal ku ilaaliya
- lahayd tallaal hore oo aad ilaalsan tahay.

Shantii qof oo qaba chronic hepatitis B ah halkan Australia labo ayaan ogayn inay qabaan cudurka. Dad badan ma muujiyaan wax astaamo ah ee cudurkaas.

Haddii aadan qabin hepatitis B, qaadashada tallaalka ayaa kaa ilaalin doonta infagshanka hepatitis B.

### Yaa laga baari karaa hepatitis B?

1. Dadka ku dhashay Asia, gobolka Pacific, Afrika, Central iyo South America, Eastern iyo Southern Europe, Caribbean iyo Bariga Dhexe. Baarisyada caafimaadka aad marto si aad ugu socdaasho Australia badanaa ma baaraan hepatitis B.
2. Dadka Aborjiinka iyo Torres Strait Islander.
3. Waxaa muhiim u ah xubnaha qoyska ee dadka qaba hepatitis B in la baaro (xataa haddii ay ku dhasheen Australia).

### Waa maxay xiriirka ka dhaxeeya hepatitis B iyo kansarka beerka?

Fayraska hepatitis B wuxuu keenaa kansarka beerka. Kansarka beerka waa ka soo-bax beerka dhexdiisa ah. Dadka qaba ama aan qabin nabar haar ah waxaa ku dhici kara kansarka beerka.

Afartii qof oo qabta chronic hepatitis B oo aan la maarayn hal ayaa heli doona nabar haar ah iyo/ama kansarka beerka.

### Yaa halis ugu jira hepatitis B-la-xiriira kansarka beerka?

Cid kasta oo qabta chronic hepatitis B waxaa ku dhici kara kansarka beerka. Ma jiro wax la yiraahdo sidaha caafimaadka qaba. Cid kasta oo qabta chronic hepatitis B waxay u baahan yihiin baarisyo joogto ah.

Maxaa ku jiri doona baaristan?
Waa fikrad fiican inaad baarisyo joogto ah la-leedahay dhakhtarkaaga. Asagu ama ayadu waxay awoodaan inay talo kaasiiyaan ku saabsan chronic hepatitis B .

Badanaa dadka qaba chronic hepatitis B waxay qaataan baarista dhiigga lixdii bilood oo kasta. Taasi waa in lagu ogaado sida uu beerkoodu u shaqeynayo.

Haddii dhakhtarkaagu uu doonayo inuu sameeyo baarisyo dheeraad ah si looga hortago kansarka beerka, waxaad qaadan kartaa:

- baarisyada dhiigga oo dheeraad ah
- ultrasound ama scan beerka lixdii biloodba mar si looga baaro ka-soo-baxa kansarka ee beerkaaga.

Baarisyadan waxay gacan ka gaysanayaan inay hore u sii-sheegaan claamadaha kansarka beerka, markay yar yihiin ayna fududahay in la daaweeyo. Badanaa baarisyadani waxaa lagu sameeyaa dadka:

- asalkoodu yahay Aaasiya (raga da'doodu ka weyn tahay 40 sano iyo dumarka da'doodu ka weyn tahay 50 sano)
- asalkoodu yahay Afrikan da'doodu ka weyn tahay 20 sano
- leh sooyaalka qoyseed ee kansarka beerka
- leh nabarka haarta beerka (cirrhosis)
- asalkoodu yahay Aboorjiinka iyo/ama Torres Strait Islander da'dooduna ka weyn tahay 50 sano.

Ma jirtaa wax daaweyn ah ee hepatitis B karooniga ah?
Way jirta daaweynta hepatitis B karooniga ah. Kaas oo fayraska ka dhigaya mid kontaroolan. Daaweyntu maahan daawo, hase ahaatee waxay gacan ka gaysan kartaa inay ka hortagto waxyeellada iyo kansarka beerka oo muddo dheer ah.

Cid kasta oo qabta chronic hepatitis B uma baahan doonaan daaweyn. Jirka ayaa kontarooli kara infagshanka. Dhakhtarka ayaa kaa caawin doona inaad go'aansato markaad u baahan tahay daaweynta.

Xataa haddii aadan u baahnayn daaweyn, waxaa weli muhiim ah inaad qaadato lixdii biloodba baaris.

Haddii aad haysato kaarka Medicare, dowladda ayaa bixinaysa qaar ama dhammaan daaweyntaada. Haddii aadan haysan kaarka Medicare, kala hadal dhakhtarka wixii la samayn karo.

Ma jirtaa wax daaweyn ah ee kansarka beerka?
Daaweynta kansarka beerka waxay ku xiran tahay baaxadda kansarka iyo bal inay faaftay. Kansarka beerka waxay fududahay in la daaweeyo haddii hore loo ogaado. Kala hadal dhakhtarkaaga wixii ku saabsan doorashada daaweynta.

Waxaan ku talinaynaa tallaabooyinka soosocda si loo yareeyo halistaada kansarka beerka la xiriira hepatitis B:

- Codso baarista dhiigga si aad u hubiso inaad qabto chronic hepatitis B, gaar ahaan haddii aad ku jirto kooxda halista-sare ah.
- haddii aadan qaadan tallaalka hepatitis B, waxaan kugula talinaynaa inaad qaadato baaristaas. Tallaalka wuxuu lacag la'aan u yahay
    - dhammaan muluqyada hadda dhashay
    - wadeyada, xubnaha qoyska ee dadka qaba hepatitis B
    - Dadka qaxootiga ah iyo dadka magangaliyo doonka ah.
- Haddii aad qabto chronic hepatitis B , ka qaado baarisyo joogto ah dhakhtarkaaga.

Si aad u yarayso halistaada guud ee kansarka:

- cab in yar oo qamri ah ama ha cabin
- cun miraha iyo qudaar badan
- ha cunin baruur badan ama hilibka la barosees-gareeyey
- ilaalso miisaanka jirka caafimaadka qaba
- si joogto ah u-jimicso (tartiib u bilow ka dibna sii badi)
- Jooji sigaarka
- Qoraxda iska ilaali (tusaale: marso sunscreen, xiro koofiyad iyo okiyaale)
- baar kansarka afka-ilmo-galenka, naasaha iyo walamadka haddii loo baahdo.

Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?
Ka eeg www.cancervic.org.au ama kala xiriir Cancer Council Victoria luqaddaada adoo ka wacaya 13 14 50. Markii aad wacdo, sheeg luqaddaada (tus. Carabi) waxaadna codsataa Cancer Council Victoria.

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan hepatitis B ka eeg www.hepvic.org.au ama ka wac Hepatitis Infoline (Khadka Macluumadka Hepatitis) taleefanka 1800 703 003. Wixii turjumaan ah ka wac 13 14 50.

Waxaa la cusboonaysiiyey: September 2016